



The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Tixraac:XRW/0180 /12/2019

Tariikh: 28/12/2019

Ku: Dhammaan Dhammaan Xubnaha Hoos Ku Magacaaban
Og: Guddoonka Labada Aqal ee Baarlamaanka JFS
Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

=Muqdisho=

=Muqdisho=

=Muqdisho=

Ujeedo:- Magacaabid Guddiga Gurmada ee Qaraxa Ex-Control Afgooye ee KM 7

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

- Markuu arkay:** Qodobka 99^{aad} xarfaha (a), (b), (e) iyo (i) ee Dastuurka KMG.
- Markuu arkay:** Qodobka 100^{aad} xarfaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.
- Markuu arkay:** Baaxadda iyo Qarada waxyeellada uu geystay qaraxii ka dhacay Ex-control Afgooye ee KM 7.
- Markuu arkay:** Qiimaha iyo mudnaanta ay leedahay in la daryeelo Shacabka Soomaaliyeed.
- Markuu arkay:** Muhiimadda iyo Nuxurka Barnaamijka Xukuumadda.
- Markuu tixgeliyey:** Mas'uuliyadda Dowladda ka saran daryeelka iyo xanaanaynta Dalka iyo Dadka Soomaaliyeed

Wuxuu Magacaabay:

Qodobka 1^{aad}

Waxa la magacaabay guddi heer Qaran ah ee u gurmashada Dadkii waxyeelladu ka soo gaartay qaraxii ka dhacay Ex-control Afgooye ee KM 7 oo hawshoodu ku eg-tahay marka si rasmi ah loo soo gaba-gabeeyo hawlaha...

1- Maxamed Abuukar Islow	Wasiirka Amniga Gudaha	Guddoomiye
2- Maxamed Cabdi Xayir "Maareeye"	Wasiirka Warfaafinta	Xubin
3- Xamza Saciid Xamza	Wasiirka Gar-gaarka	Xubin
4- Cabdi Canshuur Xasan	Wasiirka Boostada, Isg. & Tek.	Xubin
5- Cabdulqaadir Axmed-kheyr Cabdi	Wasiiru Dow. Arr. Dibadda	Xubin
6- Maxamuud Xayir Ibraahin	Wasiiru Dowlaha Maaliyadda	Xubin
7- Maxamed Saciid Cabdullaahi	Wasiir K/X Caafimaadka	Xubin
8- Cabdi Xasan Maxamed :Xijaar"	Taliyaha Ciidanka Booliska	Xubin
9- Cumar Maxamed Maxamuud	Gudd. G/Ben. Ahna Duqa Mag. Muq.	Xubin
10- Axmed-nuur Maxamed Cabdi	Xoghayaha Joogtada ee XRW	Xubin

Oodobka 2^{aad}

Xilka Guddiga

- 1- In ay si dhab ah u soo tira-koobaan dhimashada iyo dhaawacyada.
- 2- In ay diyaariyaan qorshe deg deg ah ee lagama-maarmaan u ah hawlaha gurmada.
- 3- In ay aasdQaran diyaariyaan.
- 4- In ay War-bixin joogta ah ka bixiyaan xaladda dhabta ah ee jirta.
- 5- In ay kormeeraan sida ay u socdaan hawlaha gurmada.
- 6- In ay isku xiraan, isku duwaan dhammaan hawlaha kala duwan ee gurmada.
- 7- In ay Shacabka ku bararujiyaan ka qayb-qaadashada hawlaha gurmada.



Mudane Xasan Cali Khayre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS